Isbuuclaha BSD (BSD Weekly)

Waxaa naga go'an inaan ka caawino dhammaan ardaydeena guuleystaan sanad dugsiyeedka soo socda, ama inay doorteen inay kaqeybgalaan Bararshada Fog ee Dhameystiran ee xaafadooda ama iskuulada ikhtiyaariga ah ama hadey doorteen inay iska diiwaangeliyaan Iskuulka Online-ka ee FLEX. Hoos waxaan ku sharraxnay waxaad u baahan tahay inaad ku bilowdo sannad dugsiyeedka iyo sida annagu, degmo ahaan, aan u taageereyno ardaydeena laga yaabo inay u baahan yihiin caawimaad yar oo dheeraad ah si ay diyaar u noqdaan.

Liistada Agabka Iskuulka
Sanad walba, iskuuladu waxay daabacaan liisas agabka iskuulka si qoysaska si ay u iibsadaan. Liiska sanadkaan ee degmada oo dhan ayaa tixgalineysa baahiyaha barashada guriga. Waxaan ugu yeeraynaa agabkeena “Student Success Kits.”

<u>Dhamaan agabka guusha ee ardayda (Student Success Kits for all)</u>
Earbuds, preferably with microphone
Pencils and pens
Spiral notebooks or composition books
Colored Markers
Glue stick

<u>Alaabo dheeraad ah ee ardayda dugsiyada hoose</u>
Small dry-erase board with dry-erase marker

<u>Alaabo dheeraad ah ee ardayda dugsiyada dhexe & sare</u>
Black Sharpie
Highlighter

Agabyada Iskuulka ee Bilaashka ah
Annaga oo kaashanayna Beaverton Education Foundation (BEF) iyo hawlwadeenada kale ee bulshada, waxaan isku dayeynaa inaan aruurino lacag aan ku iibsanno agab **16,000 Xirmooyinka Guusha.** Haddii lagu guuleysto, xirmooyinkan waxaa loo qaybinayaa arday kasta oo ku nool degmadeenna oo u qalma qado bilaash ah ama mida la dhimay qiimaheeda usbuuca ugu horreeya ee Sebtember. Qaybinta ayaa ka dhici doonta dugsigaaga xaafada; waxaan ka shaqeyneynaa faahfaahinta sida loogu qeybiyo ardayda Online-ka ee FLEX. *Hadaad u qalanto,* kajoogso iibsiga alaabada iskuulka.

Waxaan goor horey u weecinay mashruucan xoogaa miisaaniyada Sanduuqa Kheyraadka Bulshada ee BSD. Ma naga caawin kartaa inaan gaarno himiladeenna? Hadey haa tahay, fadlan tixgeli inaad ku deeqdo BEF Back-to-School Equip Campaign.

Waxaa dheer , waxaan leenahay **Deeq Uruurin degmada oo dhan ah ee Agabka Iskuulka Agoosto 20** kana dhacayo Beaverton High School, halkaa ood deeqi karto mid ka mid ah waxyaabaha aan kor ku soo xusnay: Albaabka Hore ee Gym (isgoyska 2nd and Stott Avenues) laga bilaabo **9 a.m. - 1 p.m.** iyo **4 p.m. - 7 p.m**.

Dhar Bilaash u ah Ilmaha
Haddii ay dugsiga joogaan iyo hadii kaleba, waan ognahay in carruurtu korayaan oo dharkana ku yaraanayo. Dharka ay degmada maamusho ee Clothes Closet ayaa dib u furmi doona Ogoosto 24 si ay u siiso dhar cusub ama waxyar la isticmaalay arday kasta oo u qalma qadada bilaashka ah ama la dhimay.

COVID-19 awgeed, waxey noqoneysaa nidaamka ballanta ku imaasho keliya. Hadaad adiga iyo ardaygaaguba aad jeceshahay inaad doorataan dhar sanad dugsiyeedka soo socda, fadlan iskaqor online. Hadaadan awoodin inaad gasho jadwalkeena online-ka ah, wac 503-356-4322 si aad ballan uga qabsato. Fadlan ogsoonow: dhammaan dadka imaanayo Clothes Closet waa xay inay xirtaan maaskaro iyo galoofyo. Haddii aadan adigu haysan, waan ku siin doonnaa.

Sanduuqyo Cuno oo Bilaash ah
Ilaa bishii Maarso, iyada oo lala kaashanayo howladeenada bulshada, BSD waxay fududaysay qaybinta 17,300 sanduuqyo cunto ah qoysaska Beaverton. Waxaan qorsheyneynaa inaan taageerno dadaalladaas illaa iyo inta suurta gal ah.

Hawlwadeenada Shirkada Pacific Coast Fruit waxay sii wadi doontaan qaybta santuuqyada cunnada Dugsiga Sare ee Aloha Arbacada laga bilaabo 12-ka p.m. - 1 p.m. Shirkadda waxay leedahay laba meelood oo dheeraad ah oo lagu qaybiyo degmada gudaheeda: St. Cecilia Church (Talaado 2 p.m.) iyo Beaverton Foursquare Church (Khamiis 9 a.m.).

In Intaa waxa u dheer, wehelkeena bulshada ee Urban Gleaners ayaa sii wadi doonna in ay ku qaybiyaan sanduuqyada cuntada Vose Elementary (Isniinta11 a.m.).

Haddii aad jeceshahay inaad taageerto dadaalladeena aan wax uga qabaneyno cunto iyo dhaqaale xumada bulshadeena, fadlanku dadaal ku tabarucida BSD Community Resource Fund.

Quraac & Qado Bilaashka ah oo la Dhimay
Waxaan sii wadaynaa barnaamijka cuntada xagaaga illaa Ogoosto 27. Intaas waxaa dheer, waxaan sii wadaynaa inaan bixino quraac iyo cunno qado la qaadanayo xilligan deyrta. Adeegyada Nafaqada ayaa la xiriiri doona meelaha laga qaadanayo. Arday kasta wuu heli karaa cuntada; ardayda waxaa lagu soo dalaci doonaa iyadoo loo eegayo iney u qalmaan kaalmada cunnada. Ogoow in ardayda isqortay BSD ee uqalma qadada lacag la'aanta ah ama la dhimay aan laga dalaci doonin cuntada, oo ay kujiraan ardayda kuqoran Iskuulka Online-ka ee FLEX.

Ilmahaagu miyuu uqalmi karaa cuntada bilaashka ah? Buuxi arjiga online. Codsiyada waxaa lagu heli karaa luqada Isbaanishka. Haddii aadan awoodin inaad ka gasho arjiga khadka, wac 503-356-3957.

Helida Internet Bilaash ah
Dhammaan ardayda ayaa u baahan doonan iney helaan internet-ka deyrta. BSD waxay iskaashi la sameysay Comcast si ay u siiso lix bilood oo internet bilaash ah iyada oo loo marayo barnaamijka Aasaasiga ah ee Comcast Internetka ee ardayda u qalanta qadada bilaashka ah ama jaban. Codsiyada waa la heli karaa online and waana in la soo gudbiyaa ugu dambeyn **Ogoosto 31.** Codsiyada waxaa lagu heli karaa Isbaanish. Haddii aadan awoodin inaad ka gasho arjiga khadka, wac 503-356-4300. Intaas waxaa dheer, waxaan qeybin doonnaa warqadaha araajida oo Ingiriisi iyo Isbaanish labadaba ee goobaha cuntada laga qaato **Ogoosto 13.**

Haddii aad tahay arday dugsi sare ah oo aan u qalmin internet bilaash ah ee Comcast, waxaad ka dalban kartaa online Hotspot-ka bilaash ah ku imanaya iskaashigeenna mashruuca Sprint ee 1Million. Haddii aadan awoodin inaad ka gasho arjiga khadka, wac 503-356-4300. Hadaad tahay arday dugsi hoose ama dugsi dhexe oo aan uqalmin internet bilaash ah Comcast, iskuuladu waxay kaala shaqeyn doonaan sidii loo qaybin lahaa meelo kale oo dheeri ah inta lagu gudajiray usbuuca koowaad ee bisha sebtember.

Ma caawin kartaa ardayda u baahan xiriirka internetka? Hadey haa tahay, fadlan tixgeli inaad ku deeqdo BEF's Back-to-School Connect Campaign.

Wargeyska Isbuuclaha ah ee BSD
Gal BSD Weekly Joornaal waxuu ku qoran yaha luqad kasta. Hadaad jeceshahay inaad aqriso Toddobaadlaha BSD ee afkaaga hooyo, fadlan riix Tarjum Joornaalka ee mareegta sanduuqa Helitaanka madow ee dhanka bidix ee kore ee joornaalka oo dooro luqaddaada.